Taxanaha Taariikhda SOOMAALIYA

Taxanaha Taariikhda

SOOMAALIYA



Waxaa Qoray
C/casiis Cali Ibrahim "Xildhiban"

London 2006

Xildhiban Publications

Tel: + 44 (0) 79 8432 9891
E-mail:
Xildhiban@hotmail.com
Xildhiban@yahoo.co.uk

First Edition 2006
LONDON

ISBN: 0-9549555-3-6

All the rights reserved. No part of this publication may be reproduced;
stored in a retrival system, or transmitted in any form or by any means,
electronic, mechanical, photocopying, and recording or orherwise,
without the prior permission of the
copyright owner.

Xuquuqda buuggan waxay u dhowrsan tahay qoraha buugga.
Qeyb ka mid ah lama daabacan karo, lama footo koobiyeyn karo,
lamana duubi karo ilaa laga helo qoraha Buuggan
oggolaansho qoraal ah la'aantiis.

Waxaa lagu daabacay magaalada London ee dalka
Boqortooyada Midowday ee Ingiriiska.

Copyright © Xildhiban 2006. All rights reserved.

Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan buuggan
waxaad kala soo xiriiri kartaan qoraha Buugga.

Xildhiban Publications

London 2006

Tel: +(44) 79 8432 9891
xildhiban@yahoo.co.uk
xildhiban@hotmail.com

Abdulaziz Ali Ibrahim
"Xildhiban"

Cover & Book Disigned By:

Mohamed Hussein
Graphic Designer

Tel: +(44) 79 0403 7262
mhgdesigner@yahoo.co.uk
welidheere@hotmail.com

TUSMADA BUUGA

Gogoldhig VIII
Hibayn XII
Mahad Celin XIII
Afeef XIV

CUTUBKA 1aad
Taariikh kooban oo ku saabsan Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed. 01
Qeybintii Dhulkii Soomaalida. 08
Dhaqdhaqaaqyadii Gobanimadoonka Soomaaliyeed. 09
Dhismihii Xisbiga Leegada "SYL" 12
13 kii Qodob ee Xisbigii Lega-da "SYL". 15
Heshiiskii Midowga Labadii Gobol ee Waqooyi & Koofur 21
Haweenka Soomaaliyeed & Halgankii Gobannimodoonka 23
Xoriyadda markii la qaatay ka dib 25

CUTUBKA 2aad
Dhalashadii Qarankii Soomaaliyeed. 27
Kacaankii 21ka Oktoobar 31
Xaashidii Koowaad ee Kacaankii Oktoobar. 40
Xaashidii Labaad ee Kacaankii Oktoobar. 41
Xaashidii Saddexaad ee Kacaankii Oktoobar. 42
Xeerkii X. H. K. Soomaaliyeed. 43

CUTUBKA 3aad
Waxqabadkii Dowladii Kacaanka aheyd 61
Qoraalkii Afka Soomaaliga 67
Dib u dhicii Dowladdii Kacaanka 70
Barnaamijkii Xeerka Qoyska 76
Awooddii Ciidamada. 79
U sinnaan la'aanta Sharciga & Xukuumadda 86
Iska horkeenka Beelaha Soomaaliya 88
Dagaalkii 1977-dii. 89
Sedbursigii Beelaha 91
Boobkii Hantida Qaranka 95
Kacdoonkii Xamar 98
Bayaankii Manifesto I. (oo ku Qoran Ingriis) 101
Bayaankii Manifesto I. ((oo ku Qoran Soomaali) 108
Magacyada xubnihii Guddiga Sulaxa 112

CUTUBKA 4aad
Dabciga Xukun jaceylka & Madaxda Soomaalida 113
Xilligii Aadan Cadde 114
Awood Maroorsigii Ciidamada 115
Dhismihii dowladdii Cali Mahdi. 118
Dagaalladii Muqdisho 119
Shirarkii dib u heshiisiinta & faragelinta shisheeyaha 120
Shirarkii dib u heshiisiinta Carte, Jabuuti ee 1aad 123
Shirarkii dib u heshiisiinta Carte, Jabuuti ee 2aad 129
Dhismihii xukuumaddii Carte, Jabuuti 133
Dhismihii xukuumadda Federaalka KMG Soomaaliya 136

CUTUBKA 5aad

XUSUUSINTA QORAHA

Dowladihii soo maray dalka Soomaaliya 139

Xubnihii Goleyaashii:-

Wasiirada, 1956 - 1960
Wasiirada; 1960 - 1969
Wasiir ku xigeennada; 1960 - 1969 148

Xubnahii Goleyaashii:-

Wasiirada; 1969 - 1990 151
Wasiiru_dowlayaasha; 1969 - 1990
Wasiir ku xigeennada; 1969 - 1990 172

Agaasimeyaashii, Maareeyeyaashii Guud 1969 -1991 180
Xubnihii XHKS 1976dii 202
Ciidamada gaaray darajada Jeneraal 1969 - 1990kii. 204
Taliyeyaashii Qeybihii Ciidamada 1960 - 1990kii. 208

Ciidanka:-

Xoogga Dalka Soomaaliyeed
Boliiska Soomaaliyeed
Asluubta Soomaaliyeed
Guulwadayaasha Soomaaliyeed
Badda Soomaaliyeed
Cirka Soomaaliyeed
Difaaca Cirka Soomaaliyeed
Lugta Soomaaliyeed
Nabadsugidda Soomaaliyeed

Taliyeyaashii Qeybihii Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed:

Qeybta 21aad ee Xoogga dalka Soomaaliyeed
Qeybta 26aad ee Xoogga dalka Soomaaliyeed
Qeybta 27aad ee Xoogga dalka Soomaaliyeed
Qeybta 54aad ee Xoogga dalka Soomaaliyeed
Qeybta 60aad ee Xoogga dalka Soomaaliyeed
Qeybta 77aad ee Xoogga dalka Soomaaliyeed

Qareenka Guud 213
Xeer illaalinta Guud
Hantidhowrka Guud

Guddoomiyeyaashii Maxkamadaha:

Badbaadada Dalka
Maxkamadda Sare
Maxkamadda Rafcaanka
Maxkamadda Militeriga

Xeer Illaalinta Maxkamadaha:

Badbaadada Dalka
Maxkamadda Sare
Maxkamadda Rafcaanka
Maxkamadda Mileteriga

Guddoomiyeyaashii soo marey:-

Bankigii Dhexe ee Soomaaliya 215
Bankigii Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed
Bankigii Horumarinta Soomaaliya
Banca Credito Somalo

Diblomaasiyiinta Soomaaliya u fadhin jirtay:-

Adduunka 1990kii 218
Qaramada Midoobay 1960 - 1991dii
Qunsulladii Dibedda 1990kii

Duuliyeyaashii Shirkadda SomaliAirlines:-

Duuliyeyaashii Diyaarahada:-

Somali Airlines 707 - 727- Airbus 300.....220
Duuliyeyaashii Cessna

Duuliyeyaashii Diyaaradaha Dagaalka:-

Mic 17, 19, 21, & Hunters 221

Guddoomiyeyaashii ugu dambeeyay ee gobollada dalka 221
Gudd. & Duqeydii soo martay maamulka magaalada Muqdisho 222

Dagaalladii Sokeeye ka dib 1991dii 223

Dowladihii soo maray dalka Soomaaliya 224
Wasiirada;
Wasiir ku xigeennada;
Wasiiru dowlayaasha 1991 - 2006
Janannadii Dagaallada Sokeeye 1991 - 2006 239
Taliyeyaal la magacaabay 2002 - 2005 240

Sharuuc ay soo saartay Xukuumada FKMG ah 2005 - 2006 241
Sir culus:- Heshiis dhexmaray Xukuumadda FKMG ah iyo ganacsade 263
Qorshaha Amniga & Xassillinta Qaranka Baydhabo 2006 268
Qoraallo dowladdii KMG aheyd ee lagu dhisay Jabuuti 2000 - 2004kii 288
Sharuuc uu soo saaray Madaxweynaha Golihii Sare ee Kacaanka 293
Muuqaallo ku saabsan madaxdii soo martay Dalka 309
Muuqaallada madaxdii is caleema saartay 311
Xubnihii ugu horreeyey ee Golihii Sharci dejinta 312
Astaamihii Ururadii Siyaasadeed 1956-dii 320
Sawirro ku saabsan Madaxdii Soomaaliyeed & kullamadii ay ku yeesheen
Dibadda & Gudaha intii ay xukunka hayeen 321
Liiskii doorashooyinka Gobollada Soomaaliya 1963 - 1964 327
Natiijooyinkii doorashooyinkii dalka ka dhacay 1960kii - 1969kii 331
Xogta uu Buugga Xambaarsan yahay 332
Taariikh Nololeedka Qoraha Buugga 336

Gogoldhig

Sida dadyow badan oo ku dhaqan dunidan guudkeeda, dadka Soomaaliyeed waxay u badan yihiin dad reer guuraa ah, marka laga reebo tiro yar. Isku celcelis qiyaas la sameeyay waxay sheegeysaa in 75% dadka Soomaaliyeed ay yihiin reer guuraa inta ka soo hartayna ay yihiin Beeraleey & reer Magaal, inkasta oo qiyaastaasi isbadal ku yimid dhowrkii sano ee ugu dambeeyay, waxaa hadda lagu qiyaasaa in ku dhow 55% in ay soo degeen magaalooyinka.

Taariikh ahaan wixii ka horreeyay qarnigii 18aad inta ayan bilaaban duulaankii dhulka Soomaalida lagu qeybsaday, Soomaalida waxay dhaqan iyo dhaqaalo ahaanba aad ugu xirnaayeen caalamka Islaamka, gaar ahaa dhulalka xeebaha ku teedsan ee Banaadir, Berbera & Bandar qaasim. “Boosaaso”

Qeybintii dhulka Soomaalida ka dib waxaa abuurmay nidaamyo ku cusub bulshada Soomaalida kana duwan xeerarkii & shuruucdii ay ku dhaqmi jireen dadka Soomaaliyeed. Waxaana aad u yaraaday xiriirkii ay Soomaalida la lahaayeen dalalkii Islaamka, iyadoo meelo badan oo ka tirsan dhulalka Soomaalida ay ka bilowdeen dhaqdhaqaaqyo lagaga soo horjeedo maamulkii soo galootiga ahaa ee gumeystaha.

Dhaqdhaqaaqyadii ugu caansanaa ee lagaga soo horjeeday waxay ahaayeen kii Axmed Ibraahim "Axmed Gurey" & kii Sayid Maxamed Cabdulle Xassan ee dhamaaday 1921kii, iyadoo halgamadaas ujeedadoodu aheyd sidii dib loogu celin lahaa dhulyowgii dadka Soomaaliyeed ee gumeystuhu wadaagay ama qeybsaday. Horraantii sanadkii 1940kii waxaa qeybo badan oo dhulka Soomaalida ee gacanta u galay gumeysigii dalka qabsaday ka bilowday dhaqdhaqaaqyo tiro dhaafay, iyadoo ururradii SYL & SNL ay bilaabeen

Ka dib markii ay madaxbannaanida gaareen gobollada Waqooyi ee Soomaaliya ee Somaliland 26kii bishii Juun sanadkii 1960kii & Gobollada Koofureed ee Soomaaliya , Italian Somaliland 1dii Luulyo isla sanadkaas 1960kii ay midoobeen labadaasi gobol isla waqtigaas, iyadoo midnimadaasi ka dib la isku raacay in labadaasi gobol ee midoobay in ay qaataan magaca **"JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA" ama "Republic of Somalia".**

Hase yeeshee unuggii ugu horreeyay ee dhisme maamul dowladeedkii ay Soomaaliya yeelatay noqday mid la yimaada loolan dhexmara qabaa'ilka Soomaaliyeed, loolan kaasina uu sababay iska hor imaad dhexmara

dhinacyadii kala hoggaaminayay ee Koofur iyo Waqooyi. Taasina waxay keentay in musuqmaasuq iyo eex lala dhex qaado Soomaalidii sugeysay nidaam caddaaladeed ku dhisan horumar iyo barwaaqo. Iyadoo halgankii loogu jirey midnimada xoreynta iyo midnimada gobollada maqan lagu iloobay hardankii u dhaxeeyay siyaasiyiintii uu damacoodu hareeray ee xilligaas.

Xeer dhaqankii wanaagsanaa ee bulshada Soomaalida oo meesha ka baxay darteed iyo qaadashada nidaam aan ka tarjumeyn dareenka dadka Soomaaliyeed, aqoonta ay u leeyihiin adeegsigiisu wuxuu keenay in uu si sahlan u burburto qarannimadii Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo riyadii Soomaaliweyn dhalashadeeda. 5kii bishii Oktoobar sanadkii 1969kii waxaa toogasho lagu dilay Madaxweynihii Jamhuuriyadda Soomaaliya Dr. C/rashiid Cali Sharmaarke, haddaba iyadoo lagu jiro baroordiiqdii loo sameeynay madaxweynahaasi kulan ay yeesheen baarlamaankii ugu dambeeyay ee la soo doorto waqtigaas la isku mari waayay cidda badaleysa madaxweynahii la qaarajiyay. Haddaba markii la aasay oo ku beegneyd 20kii Oktoobar isla 1969kii ayay saacado yar uun ka dib Ciidamadii Soomaaliya ku dhaqaaqeen Afgambi Mileteri 21kii Oktoobar isla sanadkaas.

Hoggaamiyihii xubnaha cusub ee Golaha Sare ee Kacaanku wuxuu markiiba kala diray Baarlamaankii, xabsina u taxaabay siyaasiyiintii maamulkii Jamhuuriyadda madaxda ka aheyd oo uu ugu magac dheeraa Ra'iisul wasaarihii xukuumaddaasi MD. Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, saraakiil iyo xubno ka tirsanaan jirey ciidamadii Soomaaliya oo uu ku jiro Gen. Maxamed Abshir Muusse.

Muddadii Kacaanka dalku wuxuu soo marey marxalado kala duwan oo isugu jira horumar iyo burbur dhinac kasta leh, iyadoo dagaallo iyo iska hor imaadyado fara badani ku dhexmareen ciidamadii ka soo horjeeday ee mucaaradka iyo ciidamadii Maxamed Siyaad Barre. Waxaana laga saarey gurigii Madaxtooyada ee magaalada Muqdisho 26kii bishii Jannaayo sanadkii 1991dii. Waxaana halkaasi ku dhammaaday muddadii 21ka sannadood aheyd ee xukunkii ugu muddada dheeraa ee soo mara inta la og yahay dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

Waxaa dalka guud ahaan ka bilowday dagaallo sokeeye oo dhex maraya qabaa'ilka Soomaaliyeed, dagaalladaasina waxay ka dhaceen, welina ka socdaan koofurta dalka Soomaaliya, iyadoo bartamihii bishii Abril sanadkii 1992dii ay guluf weerar oo ciidamo daacad u ahaa hoggaamiye kooxeedkii USC/SNA Gen. Maxamed Faarax Ceydiid dalka ka saareen Madaxweynihii

hore ee Soomaaliya Maxamed Siyaad Barre oo isugu ku sugnaa gobolka Gedo xaruntiisa Garbahaareey, wuxuuna ku geeriyooday 5tii bishii Jannaayo sanadkii 1995tii magaalada Legos ee dalka Nageria oo uu ku joogay magangalyo siyaasadeed.

Dagaallada ka dhacay guud ahaan Soomaaliya kuwoodii ugu cuslaa waxay ka dhaceen magaalada Muqdisho, dagaalladaasna waxay dhexmareen taageerayaashii ay kala hoggaaminayeen Madaxweynihii KMG Cali Mahdi Maxamed iyo Guddoomiyihii ururka USC Gen. Maxamed Faarax Ceydiid, dagaalladani waxay sabab u noqdeen burburka iyo kala qeybsanaanta dalkii Jamhuuriyadda Soomaaliya, iyadoo halkaasi ay ku baaba'day rajadii laga qabay dal mid ah oo Soomaaliyeed. Dhawaaqii ugu horreeyay ee Soomaali in ay kala tagtayna wuxuu ka soo yeeray gobollada Waqooyi ee Soomaaliya ee la baxay Somaliland 18kii bishii Maajo sanadkii 1991dii.

Muddadii dagaallada sokeeye ay ka socdeen dalka Soomaaliya waxaa la qabtay shirar kor u dhaafaya 14 shirar dib-u-heshiisiineed oo dhammaantood lagu gaarey heshiisyo la dhex dhigay kooxaha iyo beelaha Soomaalida ee uu dagaalka ka dhaxeeyo, wallow mid lagu guuleystay uusan jirin marka laga reebo labadii shir ee ugu dambeeyay ee lagu qabtay dalalka Jabuuti & Kenya ee lagu soo kala dhisay xukuumaddii KMG aheyd ee uu madaxda ka ahaa Dr. C/qaasim Salaad Xassan iyo tan Federaalka KMG ah ee uu hoggaamiyo Col. C/llaahi Yuusuf Axmed ee aan weli sal dhigin sida haadka duula.

Doorashadii Col. C/llaahi Yuusuf Axmed ka dib, waxaa dalka ka bilowday dagaallo kale oo ka duwan kuwii horey u dhexmaray dadka Soomaaliyeed, watana magac ka duwan kii qabiilka, kuwaas oo ka bilowday xarunta dalka Soomaaliya ee Muqdisho. Dagaalkaas oo ay ka dambeeyaan dad diidan in ay Soomaaliya salka dhulka dhigato, kana baxdo qaska iyo walaahowga aan dhamaadka laheyn ee hareeyay dalka, dagaalkan oo ujeedada ka dambeysa ay tahay in loo adeegsado hab diimeed, kaasoo dhaxalkiisu noqonayo sida taarikhdu na bareyso uu ka halissan yahay ka qabaa'ilka dhexmara.

Halista ugu weyn ee dabka holcaya magaalada xarunta ah ee Muqdisho wuxuu mar kale bilowday 18kii bishii Febraayo sanadka 2006da oo ku beegan aasaaskii ururka la magac baxay Isbaheysiga La_Dagaalanka Argagaxisada iyo soo celinta Nabadda iyo Midowga Maxaakimta Islaamiga ah ee magaalada Muqdisho oo gacan ka helaya Isbaheysiyo Siyaasadeed & Diimeed faragalin ba'an ku haya arrimaha gudaha ee dalka Soomaaliya.

Dagaalkan oo weli soconaya waxaa ku geeriyooday dad kor u dhaafaya 300 oo ruux, halka dadka ku dhaawacmayna ay kor u dhaafayaan 1.000 ruux, iyadoo sii socoshada dadka weli ku dhimanaya dagaalkaasi uu yahay mid furan oo aan la ogeyn halka uu ku dambeyn doono.

Midowga Maxaakimta magaalada Muqdisho waxay si buuxda ugu awood roonaadeen Isbaheysigii ay dagaalka la galeen, waxayna si buuxda ula wageereen gacan ku heyntii magaalada, xubnihii Isbaheysiguna isaga carareen qaarkoodna ay isu dhiibeen dowladda Federaalka KMG ah ee Soomaaliya, halka qaar kalena aan la ogeyn halka ay jaan & cirib dhigeen.

Guntii iyo gebogebadii dagaalkan soconaya wuxuu helis aan la soo koobi karin ku yahay sii socoshada burburka Qarannimo ee dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya, iyadoo ujeedadu tahay in dalka & dadka Soomaaliyeed ayan helin xassillooni waarta oo ka hirgasha gayigooda.

Waa tii hadda ka hor Abwaan Cabdi Muxumad Amiin uu ku heesay:-

Maxaa loo dig & Dam leeyahay 17/03/1973

Maxaa loo dig iyo Dam leeyahay oo gumeysi doonayaa,
Inaan dariiqa ka leexannaa baa la doonayaa,
Inaan gumeysi daba gallaa baa la doonayaa,
Inaan xumaato ku daa'innaa baa la doonayaa,
Ineysnu aammin dareysannaa baa la doonayaa,
Gumeysi diidayaa;
Ineysnu isku duubnaanna baa la diidayaa,
Inaan danteena aqoonsannaa baa la diidayaa,
Ineynu dhashanneeu dadka u ekaataa la diidayaa,
Ineynu dunida docuun ka raacnaa la diidayaa,
Gumeysi diidayaa;
Ineysu gaajo ku daa'imnaa baa la doonayaa,
Inneynu cudurka dadkiis ahaannaa la doonayaa,
Ineynu garashada ka daahnaannaa la doonayaa,
Ineynu indhaha daboolannaa baa la doonayaa..
Gumeysi diidayaa.

Haddaba aan isweydiinnee maxaa looga dan leeyahay dagaaladan ka soo cusboonaaday dalka?

Hibeyn

Waxaan mar kasta isweydiiyaa halgankii dheeraa ee ummadda Soomaaliyeed u soo galeen hellidda qaran madax banaan oo ay halaan iyo dayaca maanta shacbigiisii badeen waxa sababay burburka ku dhacay Qarannimadaasi. Haddaba waxaan shaki ku jirin in qof kasta oo qiimaha Qarannimada leedahay wax ka garanaya markii uu soo xusuuusto xilliyadii ka horreeyay burburka maanta dhacay marna wuu farxayaa, marna wuu naxayaa.

Dhab ahaan markaan dib u soo xusuusto Wanaaggii, Wadaninimadii, Midnimadii, Isqadarintii iyo Kalsoonidii Soomaalidu isu qabtay, waayihii hore iyo halka maanta ay mareyso waan ka naxaa, qof kasta oo wax ka garanaya qiimaha Qarannimadana wuu ka xanuunsanayaa markuu arko xaaladda ay maanta Soomaali ku sugan tahay ee ah:- Nidaam la'aan, Daryeel la'aan, Dagaallo joogto ah, Dulli, Qaxootinimo iyo Bahalnimo ama Dugaagnimo.

Haddaba Buuggan waxaan u hibeeyay guud ahaan dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan intii wax loogu dhimay, lagu dilay, lagu xiray, lagu dhacay, ama loo geystay falal ka baxsan bini'aadannimada.

Sidoo kale waxaan u hibeeyay dhamaan dadkii Soomaaliyeed ee uu xanuunka ka soo gaarey shisheeyahii ku soo duulay iyo maamulladii soo maray dalka iyo kooxaha Soomaalida ee foolxumooyinka iyo xasuuqqa ba'an ka geystay gobollada iyo degmooyinka uu ka kooban yahay dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya.

C/casiis Cali Ibrahim "Xildhiban"

Mahad celin

Waxaan u mahadcelinayaa dhamaan asxaabteyda oo kala joogta dalka gudihiisa iyo dibeddiisa oo aysan la'aantood suurtgal noqoteen in aan soo saaro buuggan, haddaba waxaan ka xumahay in aanan magacyadooda halkaan ku wada xusi karin, balse aan marka hore u mahadcelinayaa Xaaskeyga Marwo **Naima Ali Hussein** oo aysan la'aanteed xaggeyga suurtagal ka noqoteen in aan soo saaro buuggan ama ururiyo, isla markaana helo macluumaadka uu xambaarsan yahay.

Waxaan sharaf iyo mahadnaq aan la soo koobi karin u celinayaa dhamaan dadkii igu taageeray sidii aan u soo saari lahaa buuggan 'Taxanaha Taariikhda Soomaaliya, gaar ahaan waxaan marka hore si kal & laab ah ugu mahadcelinayaa **Dr. Xussein Cali Axmed** iyo dhammaan dadkii Soomaaliyeed ee talada igu siiyay ururinta macluumaadka uu xambaarsan yahay buuggan, haddaba waxaan mahad gaar ah u dirayaa dadkii sida hagar la'aanta aheyd waqtigooda iigu saaciday, kuwii talooyinka dheeraadka ah iigu deeqay, dadkaas oo aanan magacyadooda halkan ku soo koobi karin waxay kala yihiin:-

1. Sarreeye Guud Maxamed Cali Samatar
2. C/risaaq Xaaji Xussein
3. Dr. Sayid Cali Cabdulle Barre
4. Dr. Cabdi Muusse Mayow
5. Dr. Xussein Sheikh Axmed "Kaddare"
6. Hon. Cali Maxamed Faqay

Sidoo kale waxaan si kal iyo laab ah ugu mahad celinayaa:-

1. G/Sare C/qaadir Xaaji Masalle
2. C/qaadir Cabdi Guutaale
3. Dr. Khalid Macow C/qaadir
4. Sureer Abshir Muusse
5. Cusmaan Amiin Axmed
6. Axmed Cabdi Daahir "Shell"

Ugu dambeyntii waxaan u mahad celinayaa:-

1. Daahir Abuukar Maxamuud
2. Xaawa Maxamed Xassan
3. Aadan Salaad Cawaale
4. Maxamed Axmed Amiir
5. Axmed Muxudiin Shatax
6. Abuukar M. Maxamed "Tuuryare"
7. Abuukar Cali Gacal

Afeef

Soomaalidu waxay leeyihiin dhaqan iyo caadooyin soo jireen ah, dhaqamadaasna waxaa ka mid ah dhaqan aan anigu lafteyda ka marqaati kacayo ahna in Soomaalidu qoraalka ay aad uga jecel yihiin in ay afka wax isaga sheegaan, caado dhaqameedkan had-dii uusan wax lug ah ku laheyn dhaqamada lagu yaqaan dadka Soomaaliyeed suurtagal ma noqoteen adeegsiga wax isugu gud-binta wax ka baxsan qaabka casriga ah ee aynu maanta joogno iyo ka guuridda dhaqamada duugoobey ee ay Soomaalidu weli adeegsato.

Wax badan ka dib markii aan arkay baahida dadkeeyga u qabaan wax ama raadad la tixraaci karo oo la helo kuna biira dhaxalka Soomaalida, ayaan goostay in aan dhinaceeyga ka soo saaro buuggan oo aan rajeynayo in uu ka mid noqon doono dhaxalka da'yarta Soomaaliyeed, haddaba walaalayaal ujeedadeydu ma aheyn in aan xadgudub u geysto shaqsiyaad ama koox ka mid ah guud ahaan dadka Soomaaliyeed.

Waxaan ka dhowrsaday in aan si gaar ah ugu tilmaamo Shaqsiyaad ama Koox guud ahaan dhibaatooyinkii iyo dhac-dooyinkii ka dhacay dalkeena Soomaaliya, waxaase jirta maah-maah Talyaani ah oo oraneysa "La storia si scrive da sé" taatiikh-da iyadaa is qoreysa, dulucda iyo ujeedada maahmaahdan waxay tahay in ayan qofna u sahlaneyn in ay ka been sheegto ama ka been sheegi karto dhacdooyinkii soo maray Dadka iyo Dalka ay ummad ahaan ka soo jeedo.

Haddaba walaalayaal waxaa caado noqotay in buugaagtii la qoray ay qoreen qorayaal doonay in ay wax u gudbiyaan jiilalka soo koraya in kasta oo dunidan dacacalladeeda ku nool haddaba, buuggan wuxuu qeyb ka noqonayaa buugaagta qoran ee galeysana diiwaanka Soomaalida iyo Soomaaliya.

C/casiis Cali Ibrahim "Xildhiban"